**BANDHIGA LA TALINTA: LA TALINTA DAABACAADA KA HOR EE BROADWATER**

**XIDHITAANKA SOO JEEDINTA (JOOJINTA) DAYACTIRKA ISKUULKA**

**AKTOBER 2022**

## Hordhac

Ka dib tixgelin taxaddar leh, Golaha Wandsworth wuxuu qaatay go'aanka adag si uu ugala tashado soo jeedinta lagu xirayo Dugsiga Hoose ee Broadwater Muddada Xagaaga ee 2023, iyadoo la doonayo in dib loogu sameeyo goobta Dugsiga Baahiyaha Gaarka ah. Haddii soo jeedint la oggolaado, tani waxay siin doontaa qiyaastii 190 boos ardayda maxalliga ah ee leh baahiyaha gaar ah oo adag si ay u daboolaan baahida sii kordheysa ee degmada.

## Maxaan u u soo jeedineynaa isbeddel kan?

Soo jeedintan waxa ugu horeynti horseeday hamigeyna in caruurteena Wandsworth SEND in baahiyahooda loo daboolo gudaha, iyaga oo ku dhoweynaya qoysaskooda iyo asxaabtooda iyo baahida loo qabo in la sii wado nidaamka dugsi oo waara.

Kor u kaca baahida boosaska khaaska ah waxay la macno tahay in aanay jirin awood ku filan oo siin karta dugsigeena gaarka ah ee jira, waxaana qasab nagu ah in aanu boosas ka sameyno meel ka baxsan Wandsworth, inta badan dugsiyada madaxa banaan. Sidaa darteed, qaar badan oo ka mid ah dhallinyaradeenna SEND waa inay u safraan masaafo dheer si ay u dhigtaan dugsiyo ka fog deegaan kooda. Tani waxay saameyn weyn ku yeelan doonta carruurta, qoysaskooda waxayna sababi doonta kharash lacageed oo badan, taas oo cadaadis miisaaniyadeed dheeraad ah saaraysa guud ahaan nidaamka dugsiga.

Iyadoo baahida loo qabo bixinta takhasuska SEND ee dheeraadka ah ay kor u kacday, tirada ardayda dugsiyada hoose dhexe waxay arkeen hoos u dhac joogto ah. Tani maaha mid u gaar ah Wandsworth keliya. Hoos u dhaca carruurta da'da dugsiga hoose waa natiijada tooska ah ee qoysaska ka tagaya magaalada natiijada Brexit, kor u kaca qiimaha nolosha, isbeddelka qaab nololeedka ka dib masiibada caafada, iyo sidoo kale heerarka dhalmada hoos u dhacday ee la dareemi karo guud ahaan SW London.

Si wax looga qabto labadan arrimood waxaa loo baahan yahay tallaabo go'aan qaadasho ah si labadaba loo xaqiijiyo awood dheeri ah oo takhasus leh SEND, iyo sidoo kale dhimista boosaska dugsiga ee qeybta hoose. Soo jeedintan waxa ay ka hadleysa labadan ujeedo. Soo jeedintani maaha mid ka tarjumaysa tayada wax dhigista , xirfada shaqaalaha iyo hogaaminta dugsiga.

Waxaa naga go'an in wada-tashigan, inuu noqdo mid cad oo daah-furan, inaan dhageysanno oo ku dhaqaaqno ra'yiga iyo walaacyada kuwa ay khuseyso, iyo inaan bixinno dammaanad.

In kasta oo aan fahamsanahay soo jeedintan inay si lama-huraan ah u saameyn doonto carruurta, waalidiinta iyo macallimiinta bulshada dugsiga Broadwater, soo jeedintan waxaa loo soo gudbiyay danta guud ee dhammaan carruurta iyo qoysaska Wandsworth iyo gaar ahaan iyadoo maskaxda lagu hayo carruurta ugu nugul SEND carruurta.

# Dugsiga iyo Warbixinta LA

**Dugsiga Hoose ee Broadwater**

Broadwater Rd
London
SW17 0DZ

**Maamulka Deganka Wandsworth**

Kooxda Komiishanka
5aad Fooq
Hoolka Magaalada Wandsworth
Wandsworth High Street
London
SW18 2PU

## Aasaaska

Dugsiga Hoose ee Broadwater wuxuu ku yaal Wandsworth, agagaarka Tooting. Goobta dugsigu waa ay weyn tahay waxayna leedahay meel bannaan dibada ah oo ku filan. Dugsigu wuxuu awood u leeyahay 3 ilaa 4 nooc oo soo galitaan koox sannad kasta ah waxana uu hadda u shaqeeyaa sidii 1 nooc oo gelitaanka ah.

Guud ahaan tirada ardayda dugsiyada Wandsworth way sii yaraanaysaa tanina waxay culays dhaqaale oo wayn saaraysaa dhammaan dugsiyada hoose, oo ay ku jirto Broadwater.

Deegaanka waxaan ku aragnay koror 44% ah baahida boosaska SEND 5 tii sanno ee la soo dhaafay. Sida dhacday 2022,waxaanu ka sareynaa london waxaana jirta ardayd u baahan waxbarashada, caafimaadka iyo qorshaha xanaanada SEND ee (EHCP).

Ayada oo ay ugu wacan tahay cabirka iyo dhismaha Broadwater, waxa uu Broadwater noqonayaa goob munaasib ku ah adeeg bixiyayaasha gaar ah si u xaliyaan baahida ay qabaan ardayda SEND baahiyaha gaarka ah.

## Tirada Ardayda iyo saadaalinta

Wandsworth, tirada dugsiga hoose waxay hoos uga dhaceen 20,674 ilaa 19,149 (7.3%) 5 tii sanno ilaa Oktoobar 2021. Tirooyinka soo gelitanka waxay hoos u dhaceen 438 (14.5%) isla muddadaas, laga bilaabo 3,006 kii ugu sarreeyay Oktoobar 2016 ilaa 2,568 Oktoobar 2021. Sidoo kale waxaa la sadaalinayaa in Tirada Ardayda dugsiga bilaabaysa ee degmada ay hoos u dhici doonto dhamaadka 2030.

Tirada ardayda ee aagga Tooting waxay arkeen hoos u dhac ka weyn marka loo eego heerka degmada. Laga bilaabo Janaayo 2022, 25% (148 meelood) boosaska sanadka soo dhawaynta ee aagga lama

buuxin. Dugsiga Broadwater, tirada ardaydu waxay kala badh ka noqdeen 413 Oktoobar 2016 ilaa 206 Janaayo 2022 waxayna hadda ku dhow yihiin 150 qorista ilaa fasalka 6.

Jadwalka hoose wuxuu muujinayaa saadaasha tirada ardayda dugsiyada deegaanka shanta sano ee soo socota, taas oo muujinaysa in tirada guud ee ardayda soo galeysa ilaa fasalka 6 la saadaalinayo inay hoos u dhacaan 2027, in ka badan 330 arday ama 1.5 foomamka gelitaanka.

| **Sanadka** | **La diiwangeliyey** | **1** | **2** | **3** | **4** | **5** | **6** | **Wadarta** |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 2021/2022 A | 437 | 481 | 456 | 448 | 486 | 447 | 448 | 3,203 |
| 2022/2023 | 428 | 437 | 480 | 452 | 443 | 479 | 442 | 3,161 |
| 2023/2024 | 455 | 417 | 432 | 473 | 445 | 437 | 473 | 3,132 |
| 2024/2025 | 444 | 440 | 408 | 423 | 462 | 432 | 429 | 3,038 |
| 2025/2026 | 423 | 428 | 428 | 395 | 409 | 445 | 421 | 2,949 |
| 2026/2027 | 417 | 412 | 416 | 414 | 382 | 395 | 433 | 2,869 |

## Booska Dhaqaale

Dugsiyada waxaa loo maalgeliyaa arday kasta, taasoo ka dhigan in hoos u dhaca tirada ardayda ee dugsiyada caadiga ah ay cadaadis saarayso miisaaniyadda dugsiga.

Baahiyaha weyn ee loo qabo goobo ah SEND ayaa waxa ay cadaadis ku keenayaan dhismayaal baahiyo loo qabo oo Logu Talagalay Dugsiga SEND. Madama baahida hada jirta loo qabo aaney dabooli karin degmada ayna jirto bixin dhaqale Wandsworth waxa ay bixinaysaa £12 milyan sanad oo ay ku bixnaysaa meelo ay ku noolaan karaan caruurta.

Soo jeedinta ah in dib loogu celiyo Dugsiga Hoose ee Broadwater qayb khaas ah ayaa ka caawin doonta cadaadiska miisaaniyada iyada oo la yareynayo baahida loo qabo in carruurta lagu meeleeyo goobo madax banaan oo aad qaali u ah oo ka fog degmada oo aan daboolno hamigayaga ah in aan maalgelinno wax-soo-saarka tayada sare leh ee gudaha deegan SEND, iyada oo carruurteena lagu ilaalinayo deegaanadooda.

## Ikhtiyaaro kale oo la tixgeliyey oo la diiday

Dhowr waxyaabood oo kale ayaa la tixgaliyay ka hor inteynaan go’aansan oo aynaan soo jeedin in la xiro Dugsiga Hoose ee Broadwater. Kuwasina waxaa ka mid ah:

**Is dhex galin/Isku darid:** Tixgalin ayaa la siiyay ku biirintaan Broadwater iyo dugsi hoose oo kale. Doorashadan ayaa loo diiday dhowr sababood, oo ay ku jiraan in tani ay wali u baahan tahay xidhitaan dugsi, saamaynta balaadhan ee ay ku yeelanayso labada qaybood ee ardayda, qoysaska, kooxaha shaqaalaha iyo guud ahaan bulshooyinka dugsiga.

**Goobaha kale ee lagala kulmayo Baahida SEND.** In lagaa faaidaysto goobaha kale ee dugsiga ayaa la sahmiyay. Tani waa la diiday maadaama aysan jirin goob weyn oo ku filan oo lagu dabooli karo tirada boosaska looga baahan yahay carruurta dugsiga sare ee leh SEND adag, caqabadaha la xiriira helitaanka heshiis dugsi jira si loo dhiso goob ballaaran oo uu maamulo dugsi kale oo takhasus leh iyo saameynta dhalmada bixinta waxbarashada.

**Wax is badal ah ma jiro:** In waxba la qaban waayo ma ahan ikhtiyaar xaqiiqi ah wakhtiga hada la joogo. Hadii aynaan sameyn wax is badal ah, waxaa sii socon doonta in ay aad u korodho bixinta qarash lagu bixinayo goobo adeeg gaar ah, taas oo cadaadis badan dusha ka saareyso Baahiyaha Sare ee DSG sidoo kale taaso keenaysa cadaadis iyo culeys yareynesana deeqaha la heli karo ee Dugsiyada Wandsworth. Goobaha dheeraadka ah ee dugsiga waxay ka dhigan tahay inay jirto khatar dhaqaale oo ku wajahan nidaamka dugsiyada. Cadaadiska socda ayaa laga yaabaa inuu keeno baahida dib u habeynta shaqaalaha ee dugsiyo badan oo saameyn toos ah ku leh tayada waxbarida iyo waxbarashada.

## Oggolaansho

Walaaca ugu weyn ee waalidiinta ee la xidhiidha soo jeedintan waxay u badan tahay inay la xidhiidho oggolaanshaha, u helida boos dugsi oo ku haboon ilmahooda haddii Broadwater la xidho, iyo sidoo kale saamaynta isbeddel kasta. Haddii ay dhacdo in la soo jeediyo in la isku afgarto in aan si dhow ula shaqeyn doono bulshada dugsiga si qorsheysan, waxaana rabnaa inaan u xaqiijinno waalidiinta inaan loo baahnayn in keligood wax la qabto ama si degdeg ah looga jawaabo ogeysiinta wadatashigan.

<u>Oggolaansho</u>

Hadda waxa jira 622 boos (soo dhawaynta Ardayda fasalka 5aad) ee dugsiyada hoose oo u jirta 1.5km ciwaanka guriga ardayda Broadwater, si ay u dejiyaan 137 carruur ah Broadwater isla kooxaha isla sanadkaas.

Haddii go'aanka la gaadho in la xidho Dugsiga Hoose ee Broadwater, nidaam ogolaansho gaar ah waxa maamuli doona Kooxda Adeegga Ardayga ee Koonsilka bisha Maarj 2023 taasoo u ogolaanaysa qoysaska ardayda ay dhibaatadu saamaysay inay codsadaan dugsiyada kale ee deegaanka. Adeega Ardayda waxa uu dib u eegis ku sameyn doonaa codsiyada cusb ee dugsiga oo ah ardeydii hore waxaana uu hubin donaa oo uu xaqiijin doonaa iney la kulmaan halka ay waalidku doonayaan.

Waxaan sameyn doonaa isku day kasta si aan u siinno kooxaha walaalaha qoyska boos isku mid ah dugsiga. Goobaha waxaa loo qoondayn doonaa si waafaqsan siyaasadaha ogolaanshaha gaarka ah ee dugsiyada. Waalidiintu waxay xaq u yeelan doonaan inay rafcaan ka qaataan Guddiga Racfaanka Madax-bannaan haddii aanay suurtogal ahayn inay boos ka bixiyaan mid ka mid ah dugsiga ay doorbidaan.

<u>SEN</u>

Madaxa SEND iyo ka mid noqoshada iyo Maareeyaha Adeegga Qiimenta Baahiyaha Gaarka ah waxay si dhow ula shaqayn doonaan Broadwater SENCO si ay u taageeraan dhammaan carruurta leh EHCP iyo qoysaskooda si ay u tixgeliyaan dookhyada dugsiga, iyadoo la tixgelinayo masaafada guriga ilaa dugsiga. Waxaan sidoo kale ka wada shaqeyn doonnaa sidii aan u hubin lahayn in meelaha ay walaalaha yihiin la meeleeyo si looga fogaado cadaadis dheeraad ah oo saaran waalidiinta. Waxaan tixgelin siin doonaa kooxda SEND ee ballaaran si ay si wanaagsan u maareeyaan kala-guurka oo ay uga hadlaan wixii welwel ah ee laga yaabo inay waalidiintu qabaan.

<u>Qorshaynta kala guurka</u>

Dugsiga iyo qeybta Adeega Cilmi Nafsiga bulshada ayaa waxa ay la shaqeyn doonaan dugsiga si loo maareeyo saameynta uu soo jeedinta ama codsigan ku yeelanayo shaqaalaha, ardayda iyo qoysaskooda. Haddi ay hindisahani horumarto, waxay taageeri doonaan dugsiga si uu u sameeyo qorshaha kala guurka ee carruurta marka ay u guurayaan dugsi cusub. Wadahadalladan iyo shaqadan ayaa si taxadar leh loo qorsheeyey loona maamuli doonaa si xasaasi ah iyadoo lala hadlayo madaxa iyo hoggaanka sare. Waxaan si wada jir ah uga fekeri doonaa sidii aan horay ugu sii wadi lahayn waxbarashada wanaagsan ee khibraddan carruurta.

Marka la eego qiimaha dhibaatada nololeed, waxaa jira ballan ah in lala shaqeeyo qoysaska u baahan taageerada si ay u bixiyaan maalgelinta lebiska dugsiga natiijada isbeddel kasta.

## Habaynta gaadiidka

Xogta maran ee dugsiyada maxaliga ah ayaa waxa ay soo jeedinaysaa in 85% ardayda dugsiga Broadwater in la dhgi karo dugsi maxali ah oo masaafo dhan gaadhaya ama ku jira 1km. halka 97% la dhgi karo 1.5km Wakhti xaadirkan kaliya 19% ardayda dugsiga Broad water ayaa ku nool oo dugsiga u jira 1km Sidaa darteed, ma fileyno saameyn weyn oo ku saabsan safarrada dugsiga.

Ayadoo ay ugu wacan tahay qeybsanaanta ardeyda qaba baahiyaha gaarka ee degmada, waxaa suuragal ah in gaadiidka oo lagu dhuftay tirada ardayda cusub ee Baahiyaha Gaarka ee Saaidka qaba in Goobta Broadwater ay yeelanayso wakhti socdaal oo kooban

Sidoo kale waxa suuagal ah in qiiqa ka yimaada gaadidka iyo saameyntiisa ay yaraaneyso maadama inta badan ardaydda SLD Ay heli doonaan basas ay Gudida siisay dugsiga. Ujeedadu waxay tahay in basaska ay noqdaan gaadiid koronto ku shaqeeya saddexda sano ee soo socota si ay u yareeyaan qiiqa qiiqa aagga.

## Dugsiyada deegaanka

Ayadoo ay ugu wacan tahay tirada dugsiyada dheeraadka ee lagu soo bandhgiay xogtan rajadeena ayaa waxa ay tahay dugsiyada maxaliga iney gali karaan arday walba oo ay saameysay xidhista dugsiga Broad water hadii goaanka la qaato. Waxaanu si dhow ula shaqeyn doonaa dugsiyadan si aan u hubino in taageero munaasib ah la siiyay dhamaan ardayda xiliga lagu jiro kala guurka.

Go'aankani wuxuu sidoo kale taageeri doonaa sii wadida dhaqaale ee dugsiyada kale ee degaanka ee aagga Tooting, sidaas darteed faa'iido u leh bulshada dugsiga.

## Saamaynta ay ku yeelan doonto Shaqaalaha

Waxaan ognahay in shaqaaluhu ay ka welweli doonaan saameynta go'aan kasta, iyo wanaaggooda ayaa muhiim noo ah. Waxaan jeclaan lahayn inaan siino xaqiijinta in saraakiisha golaha, gudoomiyaasha iyo madaxda dugsigu ay halkan u joogaan si ay u taageeraan shaqaalaha inta aan geedi socodkan si wadajir ah u wadno.

Haddii soo jeedintan horay loo sii wado, waxaan u xaqiijin karnaa shaqaalaha in dugsigu sii ahaan doono mid furan sanad dugsiyeedka 2022/23.

Waxaan filaynaa in shaqo ka joojinta shaqaaluhu ay yaraan doonto maadaama shaqaalaha ay khusayso lagu taageeri doono inay tixgeliyaan ikhtiyaarkooda oo ka tarjumaya xaaladahooda gaarka ah. Xiligan waxaa jira yaraan dhinaca macalimiinta ah, caawiyaasha waxbarasha (TAs) iyo waliba

taageerayasha waxbarisha (LSAs), taas oo fursad siinaysa iyo shaqo cusub dhamaan shaqaalaha ay la badalay. Waxaan la shaqeyn doonaa dhammaan hogaamiyayaasha dugsiga Wandsworth si aan u aqoonsano oo aan u calaamadeyno boosaskan bannaan iyo taageerada shaqaalaha si ay u codsadaan una sugaan wareysiyada. Aad ayaan u fahansahay waana noo muhiim ayadoo aan laeegay go'aankan in aynaan lumin khibrada, kartida iyo xirfada shaqaalaha waxbarashada ee Wandsworth.,

Waxaan sii wadi doonaa inaan siino dhammaan dugsiyada waxbarashada iyo cilmi-nafsiga bulshada si aan uga shaqeyno oo aan u maareyno walwalka iyo dareenka taasoo lama huraan ah in la dareemo marka la eego soo jeedintan.

Si loo kabo taageerada kor lagu soo sheegay, dhammaan shaqaaluhu waxay heli karaan barnaamijka kaalmada shaqaalaha ee golaha.

## Dhismaha dugsiga.

Waxaa la soo jeediyay in dhismaha Dugsiga Hoose ee Broadwater dib loo habeeyay si loo buuxiyo baahida SEND.

Tani waxa ay siinaysaa 192 goobood taaso u dhiganta 24 fasal iyo sideed arday. Waxa la filayaa in dugsigu furmi doono, ugu damben, sannad dugsiyeedka 2025/2026.

Koonsilku wuxuu raadin doonaa inuu ilaaliyo, meel kasta oo suurtagal ah, meelaha banaan, sida kuwa loo isticmaalo dugsiga kaynta, sida aynu ognahay sida muhiimka ah iyo faa'iidada u leh helitaanka meel bannaanka ah, dabeecadda iyo beeraha dareenka ay u tahay carruurta leh SEND. Waxaan la shaqeyn doonaa quburada maxalliga ah iyo xirfadlayaasha kale si aan kuwan uga fiirsanno naqshadeena loogu talagalay bixinta cusub si loo hubiyo in boosku u shaqeeyo manhajka, u dhaqma sidii qalab waxbarasho, laakiin sidoo kale si loo sahamiyo dareenka jawi ammaan ah, kontaroolan iyo gudaha hab caafimaad leh oo togan.

## La tashiga iyo habka go'aan qaadashada

saxa jira nidaam qeexan oo qaanuuneed oo ku jira Ururka Dugsiga (Aasaasida iyo Joojinta Dugsiyada) Xeerarka 2013 kaas oo ay tahay in la raaco ka hor inta aan la gaadhin go'aan ku saabsan xidhitaanka dugsiga la ilaaliyo.  Tani waxaa sii taageeraya xeerka ay daabacday Waaxda Wasaarada waxbarashda.

Waxaa Jira shan marxaladood oo uu marayo nidaamyada ama xeerarka:

| | |
|---|---|
| La tashi: | Daabacadaa wada tashigan waxa uu sheegayaa wakhti la galiyay oo la raadiyay dhamaan dadka ku shaqada leh taaso ay tixgalin doonaan masuuliyinta dawlada hoose. |
| Daabacada | Iyada oo ku xidhan natiijada wada tashiga, maamulka deegaanka ayaa go'aamin doona in la daabaco ogeysiisyada sharciga ah ee ku saabsan xidhitaanka la soo jeediyay iyo in kale. |
| Matalaadda | Muddada matalaadda waxay bilaabmaysaa taariikhda daabacaadda ogaysiinta sharciga ah waana inay socotaa muddo afar toddobaad ah.  Inta lagu gudo jiro wakhtigan , qof walba ama urur walba waxa u soo gubin doonaa talooyin ku |

| | |
|---|---|
| | adaan soo jeedinta isagoo usoo gudibinaya masuuliyiinta si qorshaha loogu darsado inta aan la gaadhin go'aan kama dambeys ah. |
| Go'aanka | Laba bilood gudahooda laga bilaabo dhamaadka wakhtiga matalaadda waa in dawlada hoose ay go'aan ka gaadho soo jeedinta. |
| Hirgelinta | Hadii go'aanka la ansixyo Dugsiga Hoose ee Broadwater waa la xidhayaa 31 August 2023. |

Qiimeynta Saameynta Sinnaanta

Dawlada hoose waxaa looga baahan yahay inay 'tixgalin ku yeelato' waajibaadka ku qeexan Qaybta 149 ee Xeerka Sinnaanta 2010 (Waajibka Sinnaanta Waaxda Dadweynaha, 'PSED') si loo go'aamiyo soo jeedintan.  Qiimeynta Saameynta Sinnaanta ayaa la sameeyay intii lagu gudo jiray hananka cadaaldada si loo garto saameynta cadaaladeed ee soo jeedintan iyo sidii loo yareyn lahaa hadey jiro waanan raadinaya aragtida ku saabsan inta aan wadno la tashiga.

## Sida loo wadaagayo aragtiyihiina

Gudida Wandsworth waxa uu bilaabayaa inuu la tashto 12ka November si uu helo aragtiyaha ku aadan soo jeedintan la soo bandhigay. Tani waxa ay xidhmi doontaa 29ka November 2022.

**Aragtiyaahaga waxaad nagula wadaagi kartaa:**

- *Hab Onlayn ah: waxaanu jecelnahay inaan kug dhiiri galino habka Onlayn ah si ugu wanagsan uguna nidaamsan u gudbi aragtidada* https://haveyoursay.citizenspace.com/wandsworthcsd/broadwater
- *Nuqullada waraaqaha waxaa laga heli karaa haddii la codsado, adoo iimeyl u diraya* consult@wandsworth.gov.uk *ama taleefoon 020 8871 7316 (fadlan ogow in dadka soo wacaya ay doortaan ikhtiyaarka Oggolaanshaha iyo Wareejinta oo ay tixraacaan 'La-tashiga Broadwater' marka ay la kulmaan Sarkaal).*
- *Ka qaybgalka munaasibada wadatashiga ee Dugsiga Hoose Broadwater Arbacada 19ka Oktoobar 2022, 5.30-7pm.*

Marka la so gabagabeeyo marxalda la talinta dhamaan aragtiyaha waa la tixgalin doonaa sidoo kale Agaasimaha Adeegyada Carruurta isagoo la tashanaya Golaha ayaa wuxuu hogaamin doona in la daabacayo codsiyada iyo aragtiyaha la sameeyay

Cida aan kala tashanayno

Maamulka degmada ayaa la tashanaya ardayda, waalidiinta iyo daryeelayaasha, shaqaalaha, guddiga maamulka, dugsiyada kale ee deegaanka iyo ururada shaqaalaha.  Waxaan sidoo kale la tashanaynaa kooxaha kale iyo sidoo kale bulsho weynta deegaanka.

Jadwalka Wadatashiga ee la soo jeediyay

| Shaqada | Wakhtiga |
|---|---|
| **La tashiga daabacaada ka hor** | 12ka October ilaa 29ka November 2022 |

| | |
|---|---|
| **Waqtiga dib u eegista ee ra'yi celinta la tashiga iyo go'aanka Agaasimaha Adeegyada Carruurta isagoo la tashanaya hoggaanka Golaha ee carruurta haddii la daabacayo soo jeedinta sharciga ah ee isbeddeladan.** | Diseembar 2022 |
| **La tashi rasmi ah** | Janaayo 2023 |
| **Fulinta** – go’aan ku saabsan la tashi rasmiga ah. | Fulinta - Febraayo 2023 |